



## Dugsiyada PPS waxay mar kale samayn doonaan tijaabada udiyaarsanaanta dhul-gariirka gudaha Great Shakeout Oktoobar. 17

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay kubiiri doonaan dugsiyada kale ee degmada gudaha Maraykanka si ay uga qaybgalaan Great Shakeout, xaflad qaran ee udiyaarsanaanta dhul-gariirka oo la qaban doonaa Khamiista, Oktoobar 17 saacada markay tahay 10:17 subaxnimo.

Degmada waxay ka qaybgali doontaa [Great Oregon Shakeout](#), iyadoo in badan oo kamid dugsiyada PPS ay kasoo qaybgali doontaa maalinta Oktoobar 17. Dhammaan dugsiyada PPS waxaa looga baahanyahay in ay qabtaan labo tababar dhul-gariir inta lagu guda jira sannad dugsiyeed, kuwii aan kasoo qaybgalin Shakeout waxay tababar qaban doonaan Oktoobar. Dugsiyada waxay sido kale qaban doonaan tababar bisha Abriil iyadoo ay qayb ka tahay Bisha Udiyaarsanaanta Dhul-gariirka.

Kooxda Maaraynta Xaaladaha degdeg ah ee PPS waxay macluumaad kale ku leeyihiin boggeeda ([its website](#)) ku saabsan udiyaarsanaanta dhul-gariirka.

Sido kale, Portland Bureau of Emergency Management (Xafiiska Maaraynta Xaaladaha Degdeg ah ee Portland) iyo Multnomah County Emergency Management (Maaraynta Xaaladaha Degdeg ah ee Degmada Multnomah) waxay iskaashi maalgalin ku samaysay waraq macluumaad ku qoran ([informational flyer](#)) taasoo sharraxaysa [PublicAlerts.org](#), addegga lagu talagalay ogaysiinta xaaladaha degdeg ah; [Parents4Preparedness.org](#), bogga ku saabsan udiyaarsanaanta dhul-gariirka dugsiga; iyo liis kujira “shan tallaabo oo fudud ee aad qoyskaaga ku diyaarin lahayd dhul-gariir.”

PPS, iyo barnamijkeeda iskuxirka, waxay sii wadaa in ay horumar ka samayso sidii loo xoojin lahaa dhismayaasha dugsiga iyo sidii ay adkaysi uga yeelaan lahayeen dhul-gariirka. Wax badan ka baro hawsha adigoo booqanayaa [Bond Seismic webpage](#).